

Tahriib



UNHCR

The UN Refugee Agency

Waxaa qortey Zuhura Maxamed
Waxaa turjumey Maxamed Abshir Xuseen
Dhanka sawirada waxaa habeeyey Amin Amir

**SOO
BANDHIGIDA
XAQIIQADA
TAHRIIBKA**

La daabacay UNHCR, Hay'adda Qaxootiga 2016

Waxaa qortey © Zuhura Abdisamad Mahamed 2016

Dhanka Sawirada waxaa habeeyey © Amin Amir 2016

Waxaa turjumey © Moxamed Adshir Xuseen

Waxaa lagu daabacay dalka Iswiidan

Buugan waxaa surtagaliyay qoridiisa Telling the Real Story oo ah goob lagu keediyo sheekooyiin, iyo la iskuna waydaarsado sheekooyinka iyo wacyi-gelinta. Waxaa laga soo uruurshay sheekooyinka dadka magan-galyo doonka ah oo ka soo kala jeedaan dalalka Soomaaliya iyo Eritereya, kuwaas oo soo Tahriibay si ay u helaan mustaqbal iyo noolol fiican.

Ujeedada buugaan wuxuu yahay in uu siiyo maclumaad dadka da'yarta oo ka turjumaysa sawirka runta ah oo ku aadan Tahriibka. Waxaan rajaynaynaa in uu ku anfaco maclumaadka aad buugan ka helayso.

<http://tellingtherrealstory.org/>

Hooyo



Ali



Hassan




Halimo



Magafe



Tahriib




Waxaa qortey Zuhura Maxamed
Waxaa turjumey Maxamed Abshir Xuseen
Dhanka sawirada waxaa habeeyey Amin Amir

Cali waa Soomaali. Wuxuu ku
koray dalkiisa, wuxuu la noolaa
hooyadii, laba wiil iyo afar
gabdhood oo walaaladiis ah.

Aabihii wuxuu ku dhintay
dagaaladii, isagoo cunug yar ahaa.
Hadda Cali wuxuu ku jiraa sanadkii
ugu dambeeyay ee
waxbarashadiisa dugsiga sare,
wuxuuna rajaynaaya in uu galo
jaamacad markuu ka baxo dugsi
sare.



Noolasha magaalada uu deganaa Cali aad bay ugu adkaatay.
Inta badan waxaa ka dhacaayay dagaalo iyo qaraxyo joogto
ah. Wuxuu dareemay nabad-galyo xumo iyo mustaqbal
mugdi ah





Cali saaxiibadiis waxay la qabeen dareenkiisa. Waxay u shegeen in ay rabaan in ay isaga tagaan dalka oo ay aadan Yurub. Cali arinkaas ay saaxibadiis u soo bandhigeen ma hubo sida uu ka yeelaayo. Hase ahaate Cali wuxuu garanayey dad isku dayey in ay tahriiban. Qaarbaa ku guulaystay qaar kalena waa ku dhinteen inta ay ku gudajireen safarkoodi tahriibka ah.



“Lacag uma baahnid hadda, dib baad ka bixin kartaa” waxaa yidhi Xasan, oo ah saaxibkiisii ugu wanaagsanaa. Cali wuxuu u maleeyay tani iney tahay fikrad aad u fiican, wuuna aqbalay inuu raaco saaxiibadii habeenka danbe.

Xasan wuxuu garanayey dad ka caawiya sidii uu dalka uga bixi lahaa. Intii ay jidka ku sii jiray Ali aad ayuu u walwalayey sababtoo ah wuxuu hooyadiis iyo dad kale ka maqli jiray sheekoojin naxdin leh oo ku saabsan tahriibka. Diyaar uma aha Cali in uu la kulmo wax dhib ah. Waxaa uu doonayey keliya in uu tago Yurub oo uu ka galo jaamacad si uu qoyskiisa u caawino



Jidka waxay kula kulmeen dad soomaaliyeed oo sidooda kale tahriibayaal ah. Tirada tahribayaasha waa ay badnaayeen. Waxay isugu jireen rag, dumar iyo caruur aad u yar yar. Cali iyo Xasan waxay garteen gabar la dhaho Xaliimo oo ay isku magaalo ahaayeen. Xaliimo waxay ahayd keligeed. Cali iyo Xasan waxay Xaliimo u sheegeen in ay iyaga weheshan karto. Dhammaantood waxaa la geliyey gaariga qaybtiiisa dambe.



Gaadhiguna xawaare sare ayuu saxaraha ku socdey. Dadka qaarkood ayaa awoodi waayay iney xajistaan gaadhiga, qaar ayaa ka dhacay gaadhiga, laakiin darawalku uma joojinin. Cali waa uu cabsaday, xoog ayuuna u sii xajistey gaadhiga.



Gaadhiga wuxuu meel saxare ah oo ku taal xuduuda Liibya waxaa qori caaraddiis lagu khasbay in ay ka degaan gaariga. " war miyaysan balantu ahayn in aad meel fiican na geysid" ayaa nin waydiiyey wadihii gaariga. Ninkii waxaa qori lagaga garaacay madaxa. Markaas ka dib qof walba wuu cabsaday. Dadkii oo dhan way ka degeen gaadhiga.



Saxaraha aad buu u kululaa Cadina ma haysanin biyo ku filan. Waxaa uu la lugeynayey dadka 4 habeen iyo 4 maalmood. Dad qaarkood ayaa dhintey qaarna waa laga tagay sababtoo ah wey gaabinayeen. Cali, Xasan iyo Xaliimo waxay isku dayeen in aanaya ka hadhin dadka ilaa Liibiya ay ka gaadheen iyagoo daalan, ooman oo gaajeysan.



**Markay gaadheen dalka labaad , waxaa lagu wareejiyey
magafe kale wuxuuna u sheegey iney wacaan
qoysaskooda una sheegaan iney soo diraan lacago
badan hadii kale uu dilayo ka dibna uu xubnaha
jidhkooda uu kala baxayo oo uu iibinayo.**



In kastoo uu ogaa Cali ineyna hooyadii wax lacag ah haynin hadana wuu wacay. Hooyadiina aad ayey ugu faraxdey iney maqasho ayna ogaato inuu noolyahay wiilkeeda.





Cali hooyadii waxay garanweydey sidey ku heli laheyd lacagtaa faraha badan. Waxay u sheegtey inay isku deyeysyo iney hesho laakiin uu sugo.

Cali wuxuu sugayey lacagta Magafe la siin lahaa. Maalin walba oo uu sugayona waxaa loola dhaqmi jiray si xun. Waxaa la siin jiray cunto aad u yar wuxuuna arkayey wax yaalo badan oo argagax leh. Saaxiibtiis xaliimo aad ayey u xanuunsatay waxna uma qaban karin



Cali aad ayuu u murugooday kana qoomameeyay ama
shalaayey ka tegitaankii uu gurigooda ka soo tagay.
Hadda wuxuu ku sugaran yahay meel baqdin leh
wuxuuna hooyadii u sababay iney dareento murugo
aad u daran. Waa in uu Yurub gaadho hadii kale Cali
wuxuu noqonayaa mid guul daro ku dhamaaday
safarkiisa.





Kadib markii bilooyin la haystey Cali hooyadii
waxay soo dirtey lacag ay ka soo
amaahatay/deensatay ilma adeeradeed markaa
waxaa loo sheegey inuu helikaro doon todobadka
xiga tageysa Yurub. Cali wuu farxay laakiin
wuxuu u murugooday saaxiibkiis Xasan oo
qoyskiisa aan lacag u soo dirin. Cali waxaa ku
qasbanaatay in uu ka tago saaxiibkii laakiin in uu
sidaa sameeyo kuma faraxsanayn Cali.

Laba maalmood ka hor inta uusan Cali raaacin doonta ayay
Xasan qoyskiisu u soo direen lacagtiisii. Xasan hooyadii
waxay iibisey gurigeedii iyo dhulkeedii si ay u hesho lacag.
Xasan iyo Cali aad ayey u farxeen waxay noqotay in aysan
kala harin oo ay israacaan. Waxay aad uga dareen qabeen
oo uga cabsi qabeen fuulitaanka doonta, sababtoo ah
midkoodna dabaasha ma garaneynin waxayna garanayeen
dad badan kuwaas oo bada ku dhintay. Waxay llaahay ka
baryeen inuu nabad geeyo



Markii doontii la saaray dadka qaarkood waxaa lagu qasbayey iney sagxada hoose galaan qaarna sagxada sare fuulaan. Cali iyo Xasan waa la kala qeybiyey, Xasan waxaa loo sheegey inuu sagxada hoose gal, Calina dusha uu fuulo.



**Safarka badu aad buu u xumaa doontuna muuqaal
wanagsan ma laheyn. Ma dhameysan karin safarka ilaa
laga badbaadiyo**



Doontu 9 maal mood ayey bada ku jirtey, ruux walbana wuu ka raja dhigey in la badbaadiyo ama ay xeeb uun gaadhaan. Iyagoo meel ay joogaan garan la' ayaa ruux kamid ahi arkey markab dhamaantood wey wada farxeen. Wey badbaadeen dhibkii adkaana waa dhamaaday. Cali wuxuu jeclaan lahaa in uu saaxiibkii Xasan ay isku meel wada saarnadaan si ay u wada wadaagaan farxadda waqtiga ay gaaraan xeebta.



Ruux walbo oo saarnaa doonta waxaa
loo soo wareejiyey markabkii weynaa
ee badbaadada ahaa, laakiin markey is
yidhahdeen soo saara kuwii sagxada
hoose ku jirey waxay ugu tageen dadkii
oo wada dhintay. Naqaska ayaa ku
dhegey ilaa ay ka dhinteen.




Xasan wuu dhintey. Cali aad ayuu u qalbi jabey, wuxuu waayay saaxiibkiisii qaaliga ahay, Yurubna wuu ku cidloon doona. Cali wuxuu ka fekaraayay siduu ugu sheegi lahaa Xasan hooyadii in wiilkeeda, Xasan uu ku geeriyooday doontii ay wada saarnaayeen?




Cali wuu ku mahadiyey in uu noolol ku gaadhey wadanka Talyaaniga laakiin baqdin ayaa la soo daristey. Ruuxna muu ka garaneynin wadanka, luuqadana Talyaaniga ma garanaayo, lamana siinin gargaarkii uu filanaayey. Wuxuu u maleynayey in la siinayo meel uu dego, lacag iyo waxbarasho midkoodna lama siinin waxay noqotey inuu iskii u raadsado.


Cali wuxuu u xiisay qoyskiisii iyo saaxiibadiis. Waxaa aad ugu adkaatay in uu waco Xasan hooyadiis una sheego in wiilkeedii dhintay. Sidoo kale Cali wuxuu dareemay kelinimo markuu yimid Tayaaniga. Waxaa ku adkaatay in uu dhisoo noolol cusub. Wuxuu mar walba xasuustaa wax yaabihii uu tahriibka kala soo kulmay, wuxuuna is weydiyaa in uu soo tahriibo in ay u qalantay.




Hadda wuxuu joogaa Yurub wuuna ku faraxsan yahay in uu soo badbaaday wuxuuna isku dayaaya in uu samaysto mustaqbal fiican.




Dhammaad





Tahriib



Cali wuxuu ku nool yahay Soomaaliya, wuxuuna la nool yahay qoyskiisa, wax mustaqbal ah uma muuqdo. Ka dib markuu la tashtay saaxiibkiis Xasan, waxay isla go'aansadeen in ay Yurub u tahriiban. Safarkooda tahriibka ah waxay la kulmeen dhibaayooyin fara badan. In ay ku guulaysteen iyo in kale? Bal akhriso buugaan si aad u